



KALTIRSIGA SOOMAALIDA


3981



Soomaali haddaan ahay: Dadka waw gu' weyn nahay. Guun soo jiraan nahay. Nuux iyo gadaashii, duufaan ka guurkii. Baddii jiidhay gebiyada. Dhulkii giigsanaan jirey. Meeshuu ka kala go'ay. Gardafuuy ha noqatee. Weli goobtii baan naal. Caddaankiyo guduudkaba. Waan ku kala gurraacan nahay. Muuqaalka guud iyo dhaqamada is geli kara. Canfartaan gudboon nahay. Isku gibilna waan nahay. Orommadiyo Gaallaha ayaan gacal wadaaganaa. Markii qaranba goonidi. Afrikada la kala guro. Bulshada geeska bari xiga. Ku gadaaman baan nahay. Qaran iyo gob baan nahay. Lixdankii gumeysiga gacantiisa kala baxay. Calan midab u gaariyo. Summada lagu gartaa tahay xidigtaa shan geeska leh. Geysh noo ilaashiyo. Geesi uu ku dhaartoo. Gabashada ka caagiyo. Gabyaa baanu leenahay. Markey goob dagaal tahay. Guubaabada ku caano. Geeraarkiisa fulayadu. Dhex galaan cadaawaha. Dembi geliddii Oaabiil. Bankii Geeriyaadoo. Haabiil markuu go'ay. Dhirta qodaxda guratiyo. Taariikh ma garatoo. Godkii ugu horeeyee. Ina Adam galay baan. Geesihiisa weli naal. Tilmaantaydu waa gaar. Gobolkaygu waa caan. Nin Ahaaramta galay baa. Garta raad dadkaygee. Faraaciintii gudubtiyo. Masar jilashii galay. Inaan goobtii uga hadhay. Googaa yaqaanow!

DABSHIDKA

Dabshidku waa cishada sanad Soomaaligu kowsado, sidoo kale waxaa loo yaqaan Nayruus oo ka soo jeeda afka Faarisiga. Dabshidka waxay ka loo Soomaalidu ugu yeedhaan Istun. Taariikh ahaan marka la is weydiiyo sidee buu ku yimi ama xagee buu ka soo jeedaa? Soomaalidu waxay sheegaan labo asal midkood inuu ka soo jeedo. Dadka qaarkood waxay ku doodaan in dabshidku ka soo jeedo dadyowgii dabka caabudi jirey ee Majuusiinta ahaa, iyagoo sabab ka dhigaya meesha magaca Nayruus ka soo jeedo oo ahayd xarunta Majuusiinta inta la og yahay. Qolyo kale waxay sheegaan in dabshidku ka soo jeedo Doontii Nebi Nuux. Soomaalidu waxay sheegeen in xilligii Nebi Nuux ee dunida biyuhu khasifeen in shimbir ka mid ah xayawaankii doonta saaraa oo lagu tiriyoo shimbiraha wax naawiliya, inay doonta ka duushay oo muddo maalin ku dhow maqayd, shimbirtii waxay soo noqotay iyadoo caleen qoyan afka ku sida. Nebi Nuux (scw) iyo asxaabtiisii waxay garteen in shimbirtu berri soo aragtay; markaa waxay go'aansadeen in shimbirta dabogalaan, waxay iska dabo socdaanba waxay shimbirtii keentay dhulka biyihii ka sii yaraanayaan oo dhirtii qaar ka mid ah baarka la soo baxeen. Meeshaas waxaa la sheegaa inay ahayd meesha hadda magaalada Muusil ku taal ee dalka Ciraaq. Soomaalidu waxay sheegaan in shimbirtaasi ahayd Xidinxitada, geedka ay caleenta ka soo goysayna wuxuu ahaa Madheedh. Markay meeshii tageen waxay laan ka soo goosteen geedkii madheedhka ahaa oo ay madagta ka dhaliyeen si ay dab u shitaan. Soomaalidu waxay ku doodayaan in dabshidku ka soo jeedaa dabkii ugu horeeyey ee la shiday markii Nebi Nuux (scw) iyo asxaabtiisu duufaankii ka soo baxeen, isla markaana wuxuu sanad tirsiga Soomaaliduna la kowsadey cishadaas dabka la shiday. Labada qoloba dood adag bay soo bandhigeen, Allah (sw) keliya baa og runta, laakiin waxaan malaha fiican siinaynaa qolada ku doodaysa Nebi Nuux.



Dalladda Waxbarashada Ilays waa kuwahaan weyn tahay! Ballanteenu waa dan guud jirid, dardar hor leh iyo dadaal cusub.

Dago						
C	L	S	C	U	A	A
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30			

Maalmadoone						
C	L	S	C	U	A	A
				1	2	3
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	30	31

Bildhure-hore						
C	L	S	C	U	A	A
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30					

Bildhure-dhexe						
C	L	S	C	U	A	A
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

Bildhure-dambe						
C	L	S	C	U	A	A
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

Lifato						
C	L	S	C	U	A	A
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

Rajal-hore						
C	L	S	C	U	A	A
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						

Rajal-dhexe						
C	L	S	C	U	A	A
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

Rajal-dambe						
C	L	S	C	U	A	A
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

Waabariis						
C	L	S	C	U	A	A
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

Gasayar						
C	L	S	C	U	A	A
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29						

Sabuux						
C	L	S	C	U	A	A
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

Magacbiixinta cishooyinka ee hadda Soomaalidu haysato waxay ka soo jeedaa markii Allah kownka uumay iyo afkii Nebi Adam. Afka Soomaaliga ee asalka ah waxaa cishooyinka la yidhaahdaa: **Case** (Axad), **Lamme** (Isnii), **Sade** (Talaado), **Carte** (Arbaca), **Uguux** (Khamiis), **Agaax** (Jimce), iyo **Agaali** (Sabti). Cisho kasta waxay leedahay magac naanays ah oo ah: **Doraad**, **Shalay**, **Maanta**, **Berri**, **Saadambe**, **Saakuun**, iyo **Sidataal**. Sanadka Soomaaligu wuxuu kowsadaa 20kii July ee sanadka Miilaadiga ama Xilliga Dabshidka. Sanadkani waa sanad Talaadaad ama Sadaad waayo wuxuu kowsadey cisho Talaado ah ama Sade ah. Sanad cisho Talaado ah kowsadey waa sanad barwaaqo ah. Taariikhda Soomaalidu waxay sanadkan ka bilaabmaysaa 3981 (bisha Dago 1, 3981) marka laga soo bilaabo dhalashadii Nebi Ibrahim. Dugsiyada Ilays waxay ardaydooda u rajaynayaan sanad hoodo leh, guul iyo barwaaqo. Haddii Allah idmo, laga bilaabo sanadka cusub ee 3981da waxay Dalladda Waxbarashada Ilays hirgelinaysaa isticmaalka ama adeegsiga Kaltirsiga Taariikhda ee Soomaalida. Sanadka Soomaalida wuxuu kala badhkiisu ku began yahay 31ka bisha Lifato ee 3981.

Bilaha Soomaalida	Bilaha Islaamka	Bilaha Masiixiga
Dago	Muxaram	July
Maalmadoone	Safar	August
Bildhure-hore	Rabiical-Uulaa	September
Bildhure-dhexe	Rabiical-Aakhir	October
Bildhure-dambe	Jamaadul-Uulaa	November
Lifato	Jamaadul-Aakhir	December
Rajal-hore	Rajab	January
Rajal-dhexe	Shacbaan	February
Rajal-dambe	Ramadaan	March
Waabariis	Shiwaal	April
Gasayar	Dul-Qicdah	May
Sabuux	Dul-Xijah	June

Lixda Bila Dirir ama biyo Dirir waxay leeyihiin lix xilli hoosaad oo kala ah: **Diraacgood** waa xilliga ka bilaabma cishada 184aad illaa cishada laba boqol iyo toban iyo saddex dabshidka ka bacdi. **Todob** waa xilliga ka bilaabma cishada 214aad illaa cishada laba boqol iyo afartan iyo saddexaad dabshidka ka bacdi. **Aminla (Seermaweydo)** waa xilliga ka bilaabma cishada 244aad illaa cishada laba boqol iyo todobaatan iyo saddexaad dabshidka ka bacdi. **Gusooore** waa xilliga ka bilaabma cishada 274aad illaa cishada saddex boqol iyo afraad dabshidka ka bacdi. **Fishade** waa xilliga ka bilaabma cishada 305aad illaa cishada saddex boqol iyo sodon iyo afraad dabshidka ka bacdi. **Samuulad** ama **Dirir-Cawleed** waa xilliga ka bilaabma cishada 335aad illaa cishada saddex boqol iyo lixdan iyo shanaad dabshidka ka bacdi. **Bishu hadday 30 cisho tahay waa toomane, hadday 31 cisho tahay waa shin-u-dhalad.**

Change a child's life in Somalia: By sponsoring a child with Ilays Educational Academy you can reach out to a child who desperately needs your help. Right now, a child over 5 years worries his/her future every second because they lack education and medications, adequate food and clean water. This isn't a game about survival. These statistics represent real poverty. It doesn't have to be this way. Sponsoring a child costs \$165 per year.

Ilays is going to build a big education centre in Lascanod from kindergarten, primary school, high school, & to college. Could you support us even \$1. We appreciate and recognise the value of your donation, and thank you for your dedication and sympathetic consideration to help us. This is something that we welcome and appreciate. By A. M. Hussein

Magacyada bilaha ee Soomaalidu way lumeen, isla markaana waxaa soo dhexgalay khalkhal badan oo aan la koobi karin. Xog aanu ka ururinay dhammaan gobolada Soomaalida waxay tusinaysaa in gobol kasta u yaqaan magacyo u gaar ah. Iyadoo cilmibaadhistii weli socoto waxaanu go'aan ku gaadhay in magacyada bilaha ee Soomaalidu noqdaan sida soo socota:

Diraac	Lifato	31 cisho
	Rajal-hore	31 cisho
	Rajal-dhexe	31 cisho
Gu	Rajal-dambe	30 cisho
	Waabariis	30 cisho
	Gasayar	29 cisho
Xagaa	Sabuux	31 cisho
	Dago	30 cisho
	Maalmadoone	31 cisho
Dayr	Bildhure-hore	30 cisho
	Bildhure-dhexe	31 cisho
	Bildhure-dambe	30 cisho

Bilaha qaar baa sodon cisho ah, qaarna waa sodon iyo kow oo waxaa ku jira cisho loo yaqaan **yaqtiis**. Xilli biledku wuxuu u qaybsamaa afar xilli oo kala ah: Diraac, gu, xagaa iyo dayr. Mid kasta oo afartaas xilli ka mid ah wuxuu ka kooban yahay saddex bilood. Sanadka Soomaalidu waa 365 cisho. Maalinta 183aad waa cishada kala badha sanadka Soomaalida waxayna ku beegan tahay 19ka January ee sanadka Miilaadiga. Cishada sanadka kala badha waxaa loo yaqaan cisho Mahrajaan. Lixda bilood ee hore waa Bilo Danbarsame, lixda dambena waa Bilo Dirir.

Bilaha Danbarsame ama Biyo Dalalo wuxuu leeyahay lix xilli hoosaad oo kala ah: **Habar-adhi** waa marka laga soo bilaabo cishada dabshidka oo ku aadan 1da bisha Dago ama labaatanka July ee sanad kasta. **Laxkor** waa xilliga ka bilaabma cishada 31aad illaa cishada lixdanaad dabshidka ka bacdi. **Ximir** waa xilliga ka bilaabma cishada 61aad illaa cishada sa-gaashanaad dabshidka ka bacdi, waa xilliga kaliisha dayrta la galo, isla markaana ay bilaabanto in roobabka dayrta hillaadintoodu muuqato. **Axal** waa xilliga ka bilaabma cishada 91aad illaa cishada boqol iyo labaatanaad dabshidka ka bacdi, waxay roobab dabaylo wata ka da'aan xeebaha Badda Hindiya ee bariga Soomaaliya. **Musareemo** waxaa kale oo loo yaqaan **Istaaqfuroow**, waa xilliga ka bilaabma cishada 121aad illaa cishada boqol iyo kontonaad dabshidka ka bacdi, waxaa da'a roobabka loo yaqaan **Xays** oo ka da'a xeebaha bariga iyo waqooyi-bari iyagoo dabayla xoog leh wata. **Lifato** waa xilliga ka bilaabma cishada 151aad illaa cishada boqol iyo sideetan iyo labaad dabshidka ka bacdi, Cishada xilliga lifato dhammaado.

Ilays Educational Academy:
ilayseduserservices@yahoo.com
adamweli@yahoo.com